OPETUSHALLITUS RAHOITTAA HANKETTA




TAMPEREEN KAUPUNKI

## Shaxda tusmada

Macluumaad ku saabsan dugsiga hoose-dhexe ..... 2
Qiimeynta ..... 3
Doorka macalinka iyo ardayga ..... 4
Macalimiinta ..... 4
Macalinka fasalka ..... 4
Hagaha fasalka ..... 5
Macalinka maaddada ..... 5
Caawinta waxbarashada ..... 5
Waxbarashada gaarka ah ..... 6
Shaqaalaha arrimaha bulshada ee iskoolka ..... 6
Shaqaalaha cilmi nafsiga ..... 6
Kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka ..... 6
Carruurta xanuunsan iyo kuwa iskuulka ku xanuunsada ..... 7
Talaalada ..... 7
Diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah ..... 7
Barashada luqada finishka: Finishka oo ah luqada labaad iyo suugaanta ..... 8
Luqado badan ku caawi barashada luqadaha (KIETU) ..... 9
Barashada afkaaga hooyo ..... 9
Barahsada diinta ..... 10
Xeerarka iyo nadaamka iskoolka ..... 10
Dugsiga hoose -dhexe ka dib ..... 12

# Ku soo dhawow dugsiga!

***Qormadaan waxaa looga hadli doonaa habka waxbarashada dugsiyada Finland iyo nooca waxbaridda ee loo fidiyo ardeyga luqadaha badan ku hadla.***



## Macluumaad ku saabsan dugsiga hoose-dhexe

Finland waxaa ka jira waxbarasho khasab ah oo loogu talagalay dadka da'doodu tahay 7 ilaa 17 sano. Taas macnaheedu waa in dhammaan carruurta ay qasab ku tahay inay dhameeyaan dugsiga hoose iyo dhexe. Dugsiga hoose-dhexe wuxuu caadi ahaan soconayaa sagaal sano. Iskuulka carruurta dhiganayaan inta badan waa mid u dhow.

Sannad dugsiyeedku wuxuu bilaabmaa bisha siddeedaad wuxuuna dhammaadaa shanaad ama lixaad. Maalmaha ciidaha kirismaska waxay kala qeybiyaan sannad dugsiyeedka dayrta iyo midka gu`ga. Intaa waxaa dheer, inta lagu jiro sannad dugsiyeedka waxaa jira fasaxa dayrta, fasaxa jiilaalka iyo fasaxa dheelminta nabi ciise. Haddii qoysku ay rabaan fasax dheeraad ah, waa in laga codsadaa ogolaansho maamulka dugsiga. Fasaxa ciidaha diintaada waa la ogolyahay, laakiin waa in la wargeliyaa dugsiga.

Waxbarashada dugsiga hoose iyo dhexe ee Finland waa bilaash. Baridda, dhacdooyinka dugsiga, qalabka wax lagu baro iyo qalabka kale waa bilaash. Ardaygu wuxuu leeyahay cunto bilaash ah maalin kasta. Ardaygu wuxuu kujiraa caymis inta uu joogo iskuulka iyo inta u dhaxeysa masaafada guriga iyo iskuulka. Soo aadista dugsiga waa lacag la'aan haddii masaafadda dugsiga uu ka badan yahay shan kilomitir.

Xisooyinku waxay badanaaba qaataan 45 daqiiqo, laakiin muddada way ku kala duwanaan karaan dugsiyada qaarkood. Xisooyinka waxaa u dhexeeya xilliga nasasho. Waxaa jirta nasasho u dhaxeysa xisooyinka. Nasashada waxaa lagu qaataa dugsiga bannaankiisa xitaa xilliga qaboobaha. Sido kale xiisada ciyaarta dibada ayaa lagu qaataa. Ilmahu waa inay soo qataan qalabka iyo dharka ku haboon ciyaarta jawiga bannaanka ka jira.

Magaca dugsiga (Koulun nimi):

Cinwaanka dugsiga (Koulun osoite):

Magaca iyo taleefanka maamulaha dugsiga (Rehtorin nimi ja puhelinnumero):

Magaca iyo taleefanka xogheynta dugsiga (Koulusihteerin nimi ja puhelinnumero):

## Maxaa lagu bartaa dugsiga hoose-dhexe?

Dugsiyada hoose-dhexe, maadooyinka intooda badan waa kuwa la wadaago waana ku khasab dhammaan ardayda. Maadooyinka la baro waxaa ka mid ah luuqadda hooyo iyo suugaanta, luqada hooyo ee 2-aad, luqadaha ajnabiga ah, waxbarashada deegaanka, waxbarashada caafimaadka, diinta ama aragtida nolosha, taariikhda, cilmiga bulshada, xisaab, fisikis, kimistari, bayoloji, juqraafi, jimicsi, muusikada, farshaxanka sawirada, farsamada gacanta iyo dhaqaalaha qoyska.

Dhammaan waxyaabaha ku jira maadooyinkaas waa ku khasab dhamaan ardayda. Manhajka khasabka ah waxaa sidoo kale ka mid ah dabaasha. Haddii ardaygu uusan awoodin inuu ka qeybgalo xiisadda dabaasha, sabab macquul ahna ay jirto waxaa lagu bedeli karaa casharada dabaasha in uu sameeyo casharkaas xilli kale, balse waa in uu kala hadlaa macalinka qaabilsan xiisadaas. Intaas kadib uu keenaa warqad cadeyn ah in uu sameeyay wixii lagu balamay.

Maadooyinka la wadaago, ardayga waxaa u dheer doorashada maadada uu rabo isagu marka loo gudbo fasal cusub. Dugsiyadu way ku kala duwan yihiin maadooyinkaas ardaygu uu dooran karo.

## Qiimeynta

Hawsha qiimeynta ardeyda waa inay hagto oo dhiiri geliso waxbarashadiisa iyo kobcinta habka isqiimeynta ardayga. Habka waxbarashada ardaygu, shaqada iyo dabeecadda ayaa loo qiimeeyaa habab kala duwan. Laga soo bilaabo bilowga hore, ardaygu wuxuu helayaa jawaab celin iyo hagid ku saabsan waxbarashada iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan horumarkooda iyo aqoontooda.

Habka waxbarashada ardaygu sidoo kale waxaa lagu qiimeeyaa hadal ama dhibcooyin ahaan. Qiimeeynta afka ah waa suurtogal, marka laga reebo fasalka ugu dambeeya dugsiga ee fasalka 9aad. Qiyaasta qiimeynta dhibcaha waa 4 - 10. Qiimaynta 4 waxay ka dhigantahay ardaygu ma gudbin,10 waa dhibcaha ugu fiican. Dhammaadka sannad-dugsiyeedka, ardaygu wuxuu helayaa shahaadada sannad-dugsiyeedka oo qiimeyntu soo baxayso. Fasallada 5 ilaa 9, ardaygu wuxuu helayaa shahaado dhextaal ah dhammaadka dayrta. Sanad dugsiyeedka, dhammaadka gu'ga, dhammaan ardaydu waxay helayaan shahaado sannad dugsiyeedka oo muujinaysa darajooyinkooda.

Sanadkiiba mar, macallinku wuxuu waalidka ka wada hadlaa qiimeyn ku saabsan waxbarashada ardayga, xaaladda dugsiga, maadooyinka ardaygu ku wanaagsan yahay iyo maadooyinka uu ku liito. Wadahadalka u dhexeeya macalinka, ardayga iyo waalidka ayaa kobciya kalsoonida labada dhinac iyo wadaagidda macluumaadka ku saabsan xaaladda ardayga.

# Doorka macalinka iyo ardayga

Dugsigayada Finland doorka macalinku waa hagidda ardayga. Wuxuu dhiirigeliyaa oo ku hagaa ardayga si uu wax u barto. Arday kastaa si fiican ayuu wax u bartaa. Hawsha ugu muhiimsan ee macalinku waa in uu wax u barto ardaygu habkaas.

Ardaygu sida fiican ee uu wax u barto waxay ku xiran tahay isaga. Waxbarashadu waxay ku salaysan tahay kalsoonida macalinka iyo ardayga u dhaxeysa iyo mas`uuliyadda ardaygu uu iska saaro waxbarashada. Shaqada guriga (layliga) waxaa loo dhiibaa ardayga, laakiin had iyo jeer ma aha maalin kasta.

Kaalinta waalidka ee carruurtoodu waa taageerida waxbarashadooda iyo inay la shaqeeyaan macalinka. Macalinku wuxuu waalidiinta ku wargalinayaa arrimaha ku saabsan ilmaha iyo fasalka inta badan iyada oo loo marayo wada xiriirka elektaroonigga ee Wilma. Haddii loo baahdo turjubaan ayaa loo qabtaa waalidka shirarka dugsiga. Sidoo kale waa mas`uuliyada waalidka inay ku wargaliyaan macalinka fasalka haddii ardaygu ka maqan yahay dugsiga. Fariin ayuu wilmada ugu diri kartaa ama macalinka taleefankiisa haddii aad isku ogtihiin sidaas. Wargelinta ardeygu uu sameeyo kuma filna.

Arday kasta waxaa loola dhaqmaa shakhsi ahaan. Dhammaan ardayda ku nool Finland waa kuwa siman oo aan wax isdheerayn. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay jawi waxbarasho oo ammaan ah. Finland macalinka iyo waalidka midkoodna ardayga uma gacan qaadi karaan. Sido kale ardeygu uma gacan qaadi karo arday kale. Iskoolka waxaa ka mamnuuc ah dhibaateynta ama fowdeynta ardeyda kale, haddii aad la kulanto dhibaato wargeli macalinkaaga.

### Sii heynta ardeyga subaxa hore iyo galabtii.

Waxaa loogu talagalay ardeyda dhigata fasallada 1-2aad. Adeegga waxaa la qabtaa xilli ka baxsan saacadaha iskoolka. Adeeggu wuxuu kaalmeeyaa korriinka ilmaha, horumarka iyo helista waqtiga firaaqada oo ammaan ah. Ilamha soo ajaanibka ah waxay ka caawineysaa la qabsashada wadanka iyo barashada luqada finishka. Halkan carruurtu way ku cayaaraan, bannaanka ayaa loo saaraa, jimicsi ku sameeyaan iyo chasharada iskoolka oo ay ka shaqeeyaan.

Adeegga xilliga galabtii waxaa la qabtaa maalmaha iskuulku jiro, saacadaha kala ah 12:00 – 17:00. Ilmaha waxaa la siiyaa cunno fudud 14:00 qiyaastii. Adeegga subaxa hore waa inta uu iskulku bilaaban kaliya.

Waxa jirta qiimo go'an oo bishii la bixiyo. Lacag bixintu waxay ku saleysan tahay saacadaha adeegga aad dooratay. Adeeggaan waa u lacag la'aan qoysaska dakhligoodu yar yahay, kuwaas oo ay tahay inay ka codsadaan lacag-dhaafka website-ka magaalada foomka ka dhaafida lacag bixinta ee la heli karo.

# Macalimiinta

## Macalinka fasalka

Fasalada 1 - 6 ardeydu waxay wax ku bartaan fasalkooda waxaana hagaaya macalinkooda. Macalinka fasalka ayaa baraaya dhamaan inta badan maaddooyinka.

Maadooyinka qaarkood waxaa dhiga macalimiinta kale ee dugsiga, sida macalimiinta maadooyinka; tusaale ahaan, macalinka Finnishka oo ah luqadda labaad (S2). Wada shaqeynta guriga iyo dugsiga waxaa qabta macalinka fasalka, sido kale wuxuu kormeeraa waxbarashada ardeyga iyo maqnaanshihiisa.

Magaca macallinka fasalka iyo macluumaadka (Luokanopettajan nimi ja yhteystiedot):


---

## Hagaha fasalka

Fasallada 7 - 9 fasal kasta wuxuu leeyahay macalin u gaarka ah, kaa soo ilaaliyaa waxbarashada iyo maqnaanshaha ardaydiisa. Wuxuuna warbixin ka dhiibaa arrimaha guriga iyo dugsiga ku saabsan. Wadahadalada ku saabsan qiimeynta waxaa la qabtaa hal mar sanadkii. Intaas waxaa dheer, macalinka fasalka ayaa ka mas'uul ah qorsheynta iyo qaban-qaabinta taageerada ardeyga.

Magaca iyo macluumaadka la gala xiriiri karo macallinka fasalka (Luokanohjaajan nimi ja yhteystiedot):

---



## Macalinka maaddada

Fasalada 7 - 9 dhammaan macallimiinta casharada maadooyinka bixiya way kala duwanyihiin. Macalinka maaddada wuxuu khabiir ku yahay maaddadiisa, sidoo kale wuxuu hagayaa waxbarashada ardayga iyo sida looga caawin lahaa barashada maaddadaas, sida xisaabta. Haddii loo baahdo macalinkaas si gooni ah ayuu u caawinaayaa ardayga, isaga oo la kaashanaya macalimiinta kale. Faahfaahinta xiriirka macalimiinta maadada waxaad ka heli kartaa bogga dugsigaaga.

# Caawinta waxbarashada

Haddii ardaygu isaga oo aad u dadaalaaya ay waxbarashadu ku adkaato, waxa suurtogal ah inuu helo kaalmo dheeraad ah si uu wax u barto.

# Kaalmada waxbaridda

Ardayga ama waalidka waxay ka codsan karaan macalinka kaalmada waxbaridda ama macalinka ayaa soo jeedin karo, haddii uu u maleeyo in ay faa'iido u leedahay ardeyga. Kaalmadu waa saacado kooban ee ma ahan wax joogto ah. Ujeedada kaalmada waxbarasho ma ahan in ilmuhu keeno dhibco fiican ee waa kaalmeyn si looga boxo xaalada adag ee waxbarasho.

## Waxbarashada gaarka ah

Waxbarashada gaarka ah waxaa loo sameeyaa koox yar oo arday ah ama casharo shakhsiyeed oo ku saabsan maadooyin ardayga ku adag markaas. Baahida taageerada waxbarasho waxaa go'aaminaya macalinka maadada, macalinka gaarka ah ama kooxda daryeelka ardayga, ardayga iyo haddii loo baahdo waalidka. Waxaa sidoo kale jira fasallo ama goobo kala duwan oo ku yaala Tampere. Fasalada gaarka ah iyo waxbarashada gaarka ah waa kuwa waqti buuxa ah.

Waxaa sidoo kale ardeyga garab taagan shaqaalaha caafimaadka iyo ururka ardayda. Shaqaalaha daryeelka ardayda waxaa ka mid ah maamulaha dugsiga, shaqaalaha cilmi-nafsiga qaabilsan iyo kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga.

## Shaqaalaha arrimaha bulshada ee iskoolka

Shaqaalaha arrimaha bulshada waa shaqaalaha sooshalka ee iskuulka. Caawimaad waxaad ka heli kartaa haddii ardayga ay soo wajahaan dhibaatooyinka dhanka waxbarashada, saaxiibadda ama isbadal dhanka nolosha ardayga kuwaas oo saameyn ku yeelan karaan iskuulka. Sidoo kale qofka dhalinyarada ah wuxuu taageero ka keli karaa shaqalaaha sooshalka iskuulka arrimaha noloshiisa u gaar ah iyo dhanka kobaca. Dhibaatooyinka si wadajir ah ayaa loogu raadin karaa xal.


## Shaqaalaha cilmi nafsiga

Shaqaalaha qaabilsan cilmi nafsigu wuxuu ka caawin karaa, xilliga ardaygu taageero iyo caddeyn u baahan yahay, caqabadaha dareenka nolosha iyo horumarka, dhibaatooyinka shaqeynta iyo foojignaanta, xiriirka isdhexgalka guriga iyo iskuulka ama dhibaatooyinka waxbarashada.

## Kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka

Kalkaaliso caafimaad ayaa ka shaqeysa dugsiga. Kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga waxay la soconaysaa korriinka iyo horumarka ilmaha, sidoo kale wada shaqeynta waalidka iyo dhakhtarka iskuulku waa mid joogta ah. Kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka iyo dhakhtarka iskuulku waxay sameeyaan baaritaan caafimaad si loola socdo korriimada jirka (dhererka, miisaanka, araga iyo maqalka) ardayga. Sidoo kale korriinka maskaxda iyo midka bulshada waa lala socdaa. Haddii ardaygu uu xanuunsado, waa inuu tagaa xarunta caafimaadka ee xaafaddiisa.

Nabadgelyada ardayga awgeed, waxaa fiican waalidiintu inay soo sheegaan xanuunka muddada dheer qaata iyo daawooyinka kalkaalisada iyo macalinka iskuulka.



### Carruurta xanuunsan iyo kuwa iskuulka ku xanuunsada

Imaha jirran waa inaan loo soo dirin iskuulka. Kalkaalisada caafimaad ee dugsigu ma ahan kalkaaliso joogta xarunta caafimaadka, laakiin waad u tegi kartaa kalkaalisada iskuulka inta aad joogto dugsiga haddii aad jirrato ama aad ku dhaawacanto iskuulka.

### Talaalada

Waalidiintu waa inay us oo gudbiyaan kalkaalisada iskuulka dukumentiga ku saabsan talaalada horay loo siiyay caruurtooda. Haddii waalidiintu aysan haynin dukumentiga talaalada, kalkaalisada dugsigu waxay talaaleysaa caruurta iyada oo waalidka la weydinaayo ogolaansho, sidoo kale waxaa la raacayaa habka talaalka waafaqsan ee Finland.

## Diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah

Waxbarashada aasaasiga ah waxaa loogu talagalay ardayda ajanabiga ah ee da'doodu u dhaxayso 7 ilaa 16 sano ee da'da dugsiga hoose-dhexe, kuwaas oo aan aqoon luqada finnishka. Waxbarashada diyaarinta, ardayga waxaa lagu baraa luqada finnishka iyo maadooyin kale iyadoo loo eegayo heerka da'da ardayga si loo fududeeyo ku wareegidda waxbarashada guud ee aasaasiga ah.


Waxaad wax ka ogaaneysaa dugsiyada wadanka, dhaqanka, luqada iyo habka waxbarida oo ah qayb muhiim ah, u ah waxbarashada diyaarinta. Intaas waxaa dheer, waxay bartaan maadooyinka muhiimka ah iyo erayada maadooyinkaas. Maaddada diinta looma dhigo ardayga  inta lagu jiro waxbarashada diyaarinta.

Waxbarashada diyaarinta ah waxay caadi ahaan qaadataa hal sano. Intaas ka dib, ardayga waxaa lagu wareejiyaa dugsiga u dhow iyo fasalka da'diisa ama heerkiisa waxbarasho ku

habboon ama hal sano ka hooseeya heerka da'diisa. Dugsiga ayaa go'aamiya fasalka ku habboon ardayga.

Inta aysan bilaabin waxbarashada diyaarinta, kulanka hore waxa la ogaadaa taariikhda aqooneed ee ardayga iyo baahida waxbarasho ee gaarka u ah. Macalinka iyo waalidku waxay sameeyaan diyaarinta manhajka ardayga si wadajir ah. Intaa waxaa dheer, waalidka waxa lala kulmaa ugu yaraan 2 jeer sanadkaas, waxaana loo qabtaa turjubaan haddii loo baahdo.

Magaca macalinka iyo macluumaadka xiriirka (Valmistavan opetuksen opettajan nimi ja yhteystiedot):




## Barashada luqada finishka: Finishka oo ah luqada labaad iyo suugaanta

Finishka oo ah luqadda labaad iyo waxbarida waafaqsan Manhajka (S2) Wuxuu ardaygu xaq u leeyahay in uu helo inta uu ku jiro waxbarashada aasaasiga duruus dhamesytiran. Xisooyinka S2, ardayga waxay xoojiyaan aqoontiisa luqada finishka. Shaqada gaarka ah ee koorsada S2 waa inay taageerto horumarinta luqadaha kala duwan ee ardayga iyo in la kiciyo xiisaha iyo in la siiyo sahay loogu talagalay horumarinta joogtada ah ee aqoonta luqadda. Waxbarashada S2 qayb ahaan waxay beddeshaa luqadda Finnishka iyo Barashada suugaanta, sidoo kale qiimaynta S2 waxay  waafaqsan tahay ujeedooyinka ardayga ee laga leeyahay maadadaan.

Ardaygu wuxuu heli karaa barashada S2  isaga oo ka mid ah koox yar ama uu ku qaato xisooyinka lagu qaato luqada hooyo ee finishka ah. Aqoonta luqadiisa markay soo hagaagto. Ardaygu wuxuu ku wareegi karaa fasalka guud iyo xisooyinka luqada. Waxaa iska kaashada macalimiinta ku howlan waxbarashada ardeyga, mida ku habboon ardeyga in ay tahay (S2 / S1). Si kastaba ha ahaatee, mas'uulka ardayga ayaa go'aanka ugu dambeeya ka gaaraya tirada casharada ku saabsan doorashooyinka.

Magaca macalinka iyo macluumaadka xiriirka (S2-opettajan nimi ja yhteystiedot):




## Luqado badan ku caawi barashada luqadaha (KIETU)

Ku caawinta barashada luqadaha waxa loogu talagalay ardayga soo dhameeyay qaybta diyaarinta ee dugsiga dhexe. Ardaygaas oo u baahan caawimaad badan oo luqadaha ah iyo horumarinta waxbarashadiisa. Sidoo kale ardayda dugsiga hoose waa loo sameeyaa caawimaada luqada.

Ardayda caawinta barashada luqada, waxay sidoo kale ka tirsan yihiin fasalka waxbarashada guud, waxayna ka qaybgalaan casharada fasalkooda sida ugu macquulsan. Ardayda ka caawinta luqada jadwalka casharada ardayga iyo midka guud ayaa laga dhigaa kuwa isku habboon. Barashada ka caawinta luuqada (KIETU) taageero ayaa si gaar ah, loo siiyaa fahamka akhriska iyo barashada ereybixinta iyo erayada kale. Sidoo kale, waxbarid isku mar ah ayaa la siiyaa intii suurtagal ah, ka dibna macalinka caawimaada luuqada KIETU wuxuu qayb ka qaataa waxbarashada fasalka guud. Suurtagal ma ahan in waxbarasho KIETU laga helo dugsi kasta.

## Barashada afkaaga hooyo

Ilaalinta dhaqankaaga waxay xoojisaa in ardaygu garto qofka uu yahay, isku dheelitirnaanta maskaxda iyo isdhexgalka bulshada, waxayna ka caawisaa in uu qiimeeyo dhaqamada kale. Horumarinta luqadaada hooyo waxay kaloo kaa caawineysaa inaad barato luqada Finishka: Kobcinta labada luqadood waa inay wada socdaan marwalba. Ka qayb qaadashada barashada afkaaga hooyo qasab ma ahan. Balse haddii ardaygu isdiiwaangeliyo, waa inuu si joogta ah u soo xadiraa.

Waxaa iska diiwaangelin kara ardeyga luqadiisa afka hooyo aysan aheyn finish ama iswidish. Sidoo kale dadka finishka ah ee ka soo laabtay wadamo kale, kuwaas oo bartay luqada kale oo u dhigma luqada afka hooyo (waxbarashada luqadda lagu barto dibadda). Kaabista waxbarashada aasaasiga ah sidoo kale waxaa loo habeeyey ardayda ku hadasha luqadda Saame iyo Romaniga.

Waxbarashada waxaa la bilaabaa marka ay isdiiwangeliyaan arday badan. Goobta lagu qabanayo waxay noqon kartaa iskool kale. Sidaa darteed waalidka ayaa laga rabaa geynta iyo ka soo kaxeynta ilmaha xisooyinka luqada afka hooyo. Barashada luqada afka hooyo waxaa lagu beegaa xisooyinka iskoolku markay dhammaadaan kadib.

Isdiiwaangelinta iyo macluumaad dheeraad ah boggaan ka fiiri: Oman äidinkielen opetus [Tampereen kaupunki - Koulutus - Perusopetus - Opiskelu perusopetuksessa - Monikieliset oppilaat]

## Barahsada diinta

Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay barashada diintiisa, haddii tirada carruurtu ugu yaraan noqdaan saddex, waalidkana soo codsado barista maaddada diinta. Waalidiintu waxay u doori karaan maadada daraasada nolosha beddelka diintaasi (ma ahan Lutherans). Haddii ilmahu uusan laheyn wax diin ah wuxuu ka qayb qaadanaayaa daarasadda warbixnta nolosha.

## Xeerarka iyo nadaamka iskoolka

**1. Ku-dhaqanka shuruucda nidaamka**

Wakhtiga dugsigu waa sida ku cad jadwalka iskoolka ee maalinlaha ah, nasashada, sii haynta ilmaha subaxa hore iyo galabtii, sidoo kale safaro iyo xaflado kale oo dugsigu qabanqaabiyo. Dugsigu waxa uu ka kooban yahay dhismaha dugsiga, barxadiisa iyo sidoo kale meelaha kale ee waxbarashada casharada lagu bixiyo.

**2. Xuquuqda iyo waajibaadka ardayga**

Dhammaan ardaydu waxay leeyihiin xuquuq siman oo isku mid ah, aasaas dhaqameed iyo xuquuqul insaanka iyo xuquuqda goob waxbarasho oo ammaan ah. Qof kasta oo dugsiga katirsan ha noqdo arday ama qof weyn waxa ku waajib ah inay gudbiyaan hadey arkaan cagajuglayn, dhibaatayn ama gacan ka hadal. Arday kasta waxaa saaran waajib ka qayb qaadashada waxbarashada, u gutaan hawshooda sida ay tahay una dhaqmaan si wanaagsan.

**3.1 Dhaqanka wanaagsan**

Qof kastaa waa inuu tixgeliyaa midka kale, si fiican ula hadlaa, dhaqankiisa wanaajiyaa, sidoo kale siiyaa fursad ay wax ku bartaa kuwa kale. Qoraal ama sawir qof kale sameeyay iskama qaadan kartid, adiga oo soo xigan magaqaca iyo halka aad ka keentay. Si fiican waa in loo wada daryeelaa alaabta waxbarashada iyo waxkasta oo iskuulku leeyahay. Lama ogola taabashada wax qof kale leeyahay, adiga oo aan fasax u helin. Wixii aad jabiso us oo sheeg shaqaalaha iskuulka, sidoo kale ardeyga ayaa magaaya wixii jabay ama halaabay.

**3.2 Joogida iyo dhaqdhaqaaqa**

Inta lagu jiro fasaxa joog goobaha laguu tilmaamay, adiga oo raacaya tilmaamaha macalinka ilaalinta leh wakhtigaas. Haddii caawinaad aad rabto weydiiso macalinka ilaalinta ku jira markaas. Fasaxa kadib, waa inaad ku laabato fasalkaaga wakhiga laguu qabtay. Dhismaha dugsiga lagama bixi karo iyada oo aan fasax la weydiisan macalinka. Gaadiidka dhig goobaha loogu talagalay si ammaanka loo sugo darteed.

**3.3 Isticmaalka kumbuyuutarka iyo aaladaha mobilada**


Moobilka lama isticmaali karo ama lama soo baxsan karo fasax la'aan inta lagu jiro fasalka iyo wakhtiga cuntada. Ardayga ayaa laga rabaa inuu xil iska saaro isticmaalka moobilka si aan loo dhibsan wakhtiga iskoolka.

**3.4 Maandooriyaha iyo walxaha khatarta ah**

Sida sharciga Finland uu qabo lama ogola isticmaalka iyo haysashada sigaarka, maandooriyaha iyo wixii la mid ah, ardayga ka yar qaangaarka. Waxaa sidoo kale mamnuuc ah sakiinta, mindida iyo waxyaabaha dabka dhaliya sida taraqa ama waxkasta oo halis ku ah maal iyo naf intaba inaad keento iskuulka.

**3.5 Anshaxa**

Ku guuldareysiga in la raaco sharciyada waxaa laga yaabaa in ay keento wadahadal macalinka lala yeesho, warbixin kooban loo gudbiyo waalidka, fasalka oo lagaa saaro, wadahadal ku saabsan barbaarista in lagula yeesho, si gaar ah laguu fariisiyo, digniin qoraal ah, diidmada ka qaybgalka xisooyinka, samaynta shaqada guriga iskuulka kadib, nadaafad in laguu diro, baarista iyo ka qaadista walxaha mamnuuca ah ama ka burinta dugsiga muddo cayiman.



## Dugsiga hoose -dhexe ka dib

Wkhtiga ardaygu uu kujiro dugsiga dhexe, lataliyaha ardaygu wuxuu u sheegaa fursadaha kala duwan ee waxbarasho ee uu heli karo. Dugsiga aasaasiga inta badan ardaygu wuxuu uga gudbaa dugsiga sare ama midka xirfadda. Kuwaas waxaa lagu magaacabaa waxbarashada heerka labaad. Codsiga dalbashada dugsiyada xirfadahu waxay ku beegan tahay wakhtigaga jiilaalka bisha labaad – bisha seddexaad. Dugsiga sare iyo kan xirfadda waxaa la dhigtaa 2-4 sano.

Waxbarashada heerka labaad waa bilaash, Dugsiga sare ama dugsiga xirfadda kadib waxaad codsan kartaa kuulliyaddaha sare iyo jaamacahadaha. Jaamacadahu waxay leeyihiin wakhti codsigooda u gooni ah.

Waxbarashada aasaasiga ah ee khasabka ah Finland waxay dhammaanaysaa marka uu qofku buuxiyo 17 sano. Haddii ardaygu gaaro 17 jir inta lagu guda jiro waxbarashada aasaasiga ah ee dhalinyarada, waxa loo bedelayaa sannad dugsiyeedka soo socda waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn.

Magaca lataliyaha ardayga iyo macluumaadka la xiriirka (Opinto-ohjaajan nimi ja yhteystiedot):

____________________________________________________________

## Sideen uga caawin kartaa waxbarashada iskoolka ilmahaga?

◦ Tagista iskuulka waan qiimeeyaa, Sidoo kale waan u sheegaa qiimaha iskuulka ilmaheyga.

◦ Waxaan ka qaybqaataa kulamada waalidka loo qabto.

◦ Waxaan hubiyaa in ilmahaygu qaateen alaabta lagama maarmaanka ah ee dugsiga: boorsada qalinka, dharka ciyaaraha ku habboon. Hawsha ilmuhu waa inuu qaato

buugaagta, xasuus qorka iyo Qalabka kale ee loo baahan yahay in wax lagu barto, sida qalin-qore, tir-tire, mastarad, iwm.

◦ Waxaan xiiseeyaa waxbarashada ilmahayga. Dheh kawaran iskuulka maanta: maxaad soo baratay? Waqtiga firaaqada maxaad sameysay? Maxaa lagu kariyay iskuulka oo aad cuntay? Waa kuma saaxiibkaaga gaarka ah?

◦ Waxaan xaqiijinaa in ilmahu helo habeenkii hurdo ku filan, si joogto ah wax u cuno una jimicsado in ku filan. Isticmaalka taleefanka waalidku waa inuu la socdaa, haddii loo baahdo, in la xadeeyo wakhtiga.

◦ Maqnaanshaha: Waxaan ogeysiiyaa dugsiga marka ilmuhu xanuunsado. Ilmaha xanuunsan looma diri karo iskuulka.

◦ Waxaan hubiyaa in ilmahu si joogto ah u aado dugsiga. Waxbarashadu way sii adkaanaysaa, shaqada guriga (layliga) oo la sameyn waayo sidoo kale maqnaanshaha oo bata. Dugsigu wuu la socdaa maqnaashaha aan fasax loo heysan, ardaygu wuxuu helayaa ganaaxyo kala duwan.

◦ La xiriir macalinka haddii aad su'aalo qabto ama dhibaato jirto.

◦ Waxaan hubisaa in ilmahu uu sameeyay shaqadiisa guriga. Shaqada gurigu waa shaqada ugu muhiimsan ee ardayga. Waxaan siinayaa ilmaha jaanis uu ku sameeyo shaqada guriga si dagganaan leh. Waa inaad sidoo kale sameysaa shaqada guriga maalmaha aad ka maqan tahay iskuulka.

## Linkiga hoose ayaad ka helaysaa wax badan

Tampereen kaupunki monikieliset oppilaat

Koulunkäynti ja oppimisen opas-tuki eri kielillä (VIP-verkosto)

Koulusanastot eri kielillä

Qoraha tilmaamahan: Terhi Kuokka

Qoraalka la tafatiray oo la cusboonaysiiyay Febraayo 2024: Johanna Heikkinen, Kristiina Jokinen iyo Miina Sivula Tustaikurit Oy

Sawirada tilmaamahan: Tussitaikurit Oy

